

**Dekretada Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamba. 89 ee 23 Maarso1966
Xadiideynta Xeer Nidaamiyaha Howlaha Dhaqaalaha ee dibedda**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 85 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay faqradda 2 ee qodobka 2 ee Xeer-sharci lamba. 12 ee 26 Setember oo wax lagau beddeley sharciga lamba. 8 ee 23 Oktoober 1964 ee la xiriira Xeer-nidaamiyaha howlaha dhaqaalaha ee lala yeesho dibedda;

Kadib markii la arkay qod. 2 ee DPR 26 Setember 1961 lamba. 203 oo la xiriirta xadiideynta Xeer nidaamiyaha howlaha dhaqaalaha ee lala yeesho dibedda;

Kadib markii la garawsaday in la habeeyo ganacsiga mooska ee dowladaha Bariga Dhexe si loo ilaaliyo misaan iyada bixinta lacagaha iyo horumarinta iyo wada shaqeynta ganacsiga ee dowladaha aan heshiis lala yahay;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Dhoofinta mooska ee dalaalka Bariga Dhexe waxaa lagu xiray shatiga dhoofinta.

Qod. 2

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco, waxaana la horgeyn doona Golaha Qaranka si sharci loogu beddelo sharci sida ku qoran qod. 63 ee Dasturka.

Muqdisho, 23 Maarso1966.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga

Dr. Mohamed Haji Osman